COVID-19 Talo Siinta Daryeelka Ilmaha

Dib loo eegay 3-27-20 2:00 PM

King County waxay adeegsanaysaa istiraatiijiyado ay ku hakineyso fiditaanka COVID-19. Markay ahayd Maarso 12, gudoomiye Jay Inslee wuxuu ku dhawaaqay in dhamaan iskuulada Gobolka Washington laxiri doono laga bilaabo Maarso 17 ilaa Abriil 24, 2020. Waqtigaan, amarku kuma jiro xiritaanka daryeelka caruurta iyo barnaamijyada waxbarashada hore.

Daryeelka ilmaha iyo barnaamijyada waxbarashada hore waxay door muhiim ah ka ciyaaraan jawaabta an ka bixinayno COVID-19. Iyaga oo u ogolaanaya waalidiinta inay sii wadaan shaqada, waxay ku sii hayaan qolalka gurmadka degdegga ah inay shaqada sii wadaan, ganacsiyada lama huraanka ah inay shaqeeyaan, iyo inay carruurteenna ammaan haystaan. Bixiyeyaasha xanaanada carruurta ayaa muhiim u ah bulshadeena, oo aad ayaan ugu mahadnaqaynaa.

Maamulayaasha xanaanada curuurta waxay qaadi karaan talaabooyin muhiim ah si ay uga caawiyaan kahortaga iyo u diyaarinta kiisaska COVID-19 ee goobta daryeelka ilmaha, oo ay ku jiraan:

Qorsho iyo wada xiriir

- Ogeysii dhammaan waalidiinta, carruurta, shaqaalaha, iyo kuwa iska wax u qabsada ah, wax ku saabsan tallaabooyinka qof walba uu qaadi karo si uu naftiisa u badbaadiyo ugana hortago fiditaan dheeraad ka ah. Ku dar farriimaha si wax looga qabto dhaleeceynta iyo takoorka.
- La Wadaag Caafimaadka Dadweynaha Xaashiyaha Xaqiiqda ee COVID-19 ee qoyska.
- U Adeegso Caafimaadka Dadweynaha Liiska Hubinta ee Maamulayaasha Daryeelka Ilmaha.
- Dib u eeg, cusboonaysii, iyo hirgalinta qorshayaasha xaruntaada ee xaaladaha degdegga ah.

La soco caafimaadka ardayda iyo shaqaalaha

- Weydii waalidiinta inay hubiyaan heerkulka caruurtooda, sidoo kalana shaqaalaha weydii inay hubiyaan heerkulkooda, maalin kasta ka hor intaaysan imaan xanaanada carruurta. Weydiiso in dhammaan carruurta iyo shaqaaluhuba inay joogaan guriga oo ay ka fogaadaan dadka kale hadii ay leeyihiin: heerkul u dhigma ama ka weyn 100.4F; qufac; neefta oo yaraata; ama astaamo kale oo ka mid ah jirada cusub, oo aan ku xirnayn xaalad hore u sii jiray.
- Samee nidaam maalinle ah oo lagu garto sidoo kalana loogu diro shaqaalaha iyo carruurta buko guryahooda inta lagu jiro xaruunta.
- Qorshayso oo ilaaliso carruurta iyo shaqaalaha aan imaan xannaanada carruurta. Ururi macluumaadka ku saabsan maqnaanshahooda. Cudurada ku diiwaan-geli xaashida diwaangelista ah , sida lagu amray WAC 110-300-0465.

Hoos u dhig faafidda jeermiska ee xaruntaada

- Nadiifi, Fayodhowr, oo jeermiska ka nadiif txarunta daryeelka ilmaha si joogto ah.
- Sii wad adeegsiga Qalabka is ilaalinta Shaqsiyadeed (PPE) iyadoo la raacayo amarada WAC ee hadda jirta.
- Xulo nashaadyo abuuraya boos badan oo jira una dhexeeya carruurta dhexdooda. n.

Talooyinkaan waa la cusbooneysiin karaa marka uu cudurku dillaaco. Caafimaadka Dadweynaha ayaa kaga mahadcelinaya dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga markii aan wax ka qabanayno caqabadaha maalinlaha ah ee COVID-19 oo an usoo bandhigno bulshadeena. Wixii ku saabsan cusboonaysiinta joogtada ah ee xaaladdan oo soo ifbaxa, booqo: www.kingcounty.gov/covid

- Haddii daryeelka ilmahaagu leeyahay kiis COVID-19, ka fikir inaad xaruunta xirtid si ku meel gaar ah. Waqtigan u isticmaal inaad ku nadiifiso oo aad go'aamiso inta cudurku ku faafay.

Tixraac dukumintiga, Tilmaamaha loo bandhigiyo Maamulayaasha Daryeelka Caruurta: Maxaa la Sameyaa Markaad Hayso Kiis COVID-19 oo ku dhacay Bulshadaada.

.

La socodsii

- Tilmaanta Maamulayaasha Barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee Mareykanka iyo iskuulada K-12 si loo qorsheeyo, loo diyaariyo, lagana jawaabo Cudurka Coronavirus 2019 9(CDC)
- Kheyraadka Daryeelka Ilmaha iyo Talooyinka (DOH)

Waxaad ogaan kartaa inay ku kala duwan yihiin tilmaamaha ay soo saareen hay'adaha maxalliga ah, kuwa gobolka, iyo kuwa qaran. Degmada King County hada waxaa si aad ah saameyn ugu leh COVID-19 marka loo eego degmooyinka kale ee badan ee gobolka iyo wadanka oo dhan. Caafimaadka Dadweynaha- Tilmaanta Seattle iyo King County waxay ka tarjumaysaa go'aankeena ku saabsan ilaalinta caafimaadka iyo amniga deganeyaashayada iyadoo la raacayo duruufahaheena gaarka ah ee deegaanka.

Kheyraadka shaqaalaha iyo qoysaska

- Waxa la sameeyo haddii aad xaqiijiso ama aad ka shakisan tahay cudurka Coronavirus (COVID-19), oo aad suura gal u ahayd qof, ama aad leedahay calaamado s DOH)
- Caabuqa Coronavirus 2019 (COVID-19),) oo ay ku jiraan xaashiyaha xaqiiqda daabacan iyo ilaha kale ee maxalliga ah (PHSKC)
- Bogaga internetka ee Caafimaadka Bulshada , , oo ay kujiraan cusbooneysiinta maalinlaha ah iyo aragtida laga helo xirfadleyda Caafimaadka Dadweynaha (PHSKC)
- Wixii ku saabsan Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) (CDC)
- COVID-19 iyo carruurta (CDC)

Talooyinkaan waa la cusbooneysiin karaa marka uu cudurku dillaaco. Caafimaadka Dadweynaha ayaa kaga mahadcelinaya dulqaadkaaga iyo iskaashigaaga markii aan wax ka qabanayno caqabadaha maalinlaha ah ee COVID-19 oo an usoo bandhigno bulshadeena. Wixii ku saabsan cusboonaysiinta joogtada ah ee xaaladdan oo soo ifbaxa, booqo: www.kingcounty.gov/covid